



# Faafin Rasmi ah

3 JUL 19 73  
Cont Copy

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIIKA SOMALIYA

Sanadka 1

Muqdisho ah 12kii Maggio 1973

L. 6

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

### BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Maggio 1973 — *Dallacstin Suraakil ka tirsana Ciidanka Boliska Somalied.* L. 45.

Bog. 86

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Aprile 1973 — *Sismo dhul Dowladeed la siiyey Jaalle Gabdullahi Xusen Iusuf.* L. 46.

» 88

### BOGGA SEDDEXAAD

TALLOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 2 Maggio 1973 — *Badaalad naado dhul uu leeyahay Jaalle Barre Cali.* L. 45.

» 89

WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Jaalle Axmed Gusman Roble.</i> L. 46	Bog. 89
WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Jaalle Halan Moxamed Abditon.</i> L. 47	» 90
WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Jaalle Cabdixamid Moxamud Carale.</i> L. 48	» 90
WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Jaalle Moxamed Xasan Gusman.</i> L. 49	» 91
WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Alessandra Fianello Cabud.</i> L. 50	» 91
WASAARADDA HALAHA GUU Ogeysiis Naada dhul 5 Maggio 1973 — <i>Cabdinur Xaji Xashi.</i> L. 51	» 92
MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR, 8 Aprile 1973 Dhumidii bugga Lacagta — <i>Jaalle Caddow Cali Jumcale.</i> L. 52	» 92

---

## BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

---

## BOGGA LABAAD

XEER DOWLADÉED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA  
2 Maggio 1973, L. 45.

Dallacsin Saraakiil ka tirsan Ciidanka, Boliska Somalilyeed.

## GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii koowaad ee 21kii Oktober 1969;

ISAGOO ARKAY Qaynuunkii lam. 2 ee 23kii disambar 1972, iyo sharcigii hoose ee la cirriirsamraa hanaanka iyo dhisamaha Ciidanka Boliska;

ISAGOO ARKAY Taladii u-soo jeediyay Taliyaha Ciidanka Boliska u kuna soo sheegay xaashiyihii alaa lam. SEC. A-8-1 ee 30-12-1972 iyo 5-4-1973;

ISAGOO AQOONSADAY Saraakiisha Hoose ku magacaban in la dallacsiyo iyadoo la tixgelinayo sida ay uska la-horeyaan, kartidooda iyo waxay mutaystaan;

ISAGOO HUBIYEY in ay jagooyin ka banaan yihiin Talagalka Tiro Joogta ee Saraakiisha Boliska;

ISAGOO DHEGEESTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gadaha.

## WUXUU XEERAYA

### Qodobka 1

In Gaashaanleyaasha Boliska hoos ku magacaaban la dallacsiyey, lana siiyey darajada Gaashaanle. Dhexe marka laga bilaabo 1da jannayo 1973 kuna hirgelaya xagga sharciga iyo dhaqaalaha:

1. — Gaashaanle Cabdulqadir Samura;
2. — » Mumin Ibrahim Isaq;
3. — » Cali Adan Botan;
4. — » Maxamud Cilmi Cali;
5. — » Maxamud Maxamed Din;
6. — » Jamac Xersi;
7. — » Yusuf Shuriye.

### Qodobka 2

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doona faafinka rasmiga ah.

Muqdisho, 2 Maggio 1973.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka  
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha  
S. Guuto Xusen Kulmie Afrax

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Lagacta  
Takh. Maxamad Yusuf Weyrax

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 59.  
Mogadiscio, 7 Maggio 1973.  
Il Magistrato ai Conti:  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

28 Maggio 1973, L. 48.

Sismo dhul dawladeed la siiyey Cabdullahi Xusen Yusuf.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Wowaaad iyo tii labaad eeKa-caanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobare 1969;

ANNAGOO ARAGNAY arji u soo qortay Cabdullahi Xusen Yusuf tarikh deeduna aheyd 21-2-1961 kuna yaal X. Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY naa dadii dhulka a ee lagu dheijiyey xa-aafiiski ku shaga lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsan naqahada dhismaha lambarkoodu yahay 1431 bishii Febbraio 28kii 1973 soona gudubtay fadhigii 17<sup>o</sup> aad 20kii Febbraio 1973;

ANNAGOO ARAGNAY warqadda tiradeedu ahayd L. 81786 tariikhdee 26-2-1973 in Cabdullahi Xusen Yusuf uu dhibay xafiska Canshurta dawladda lacag tiradeedu tahay Sh. So. 864; eshw

ANNAGOO ARAGNAY xanshada ku saabsan siismaba dhulka lambarteda yahay WHG-3-23-213 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiyay 288 mdh.;

ANNAGOO ARAGNAY warqadda ku qoran qanunka siismada dhulka iyo farsamada oo tiilmanmeyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY xaashada hobsinada dhulka ay qortay xa-fiiska farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, tarikhddi ahayd 19-4-1973;

ANNAGOO ARAGNAY warqadda soo qortay xafiska ku shaqa leh L. 490 oo cadeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan anqshada dhismaha;

ISAGGO AQOONSADAY in waaji batikiisi innu ka bahay ninka kor ku soo sheqay;

**AMAR XEER**

Waxaan la caddeynayaa in Cabdullahi Xusen Yusuf la siiyey dhul dawladeed ee ku fadhiya 288 mdh. kuna yaala Muqdisho — Xafadda Waberi.

Muqdisho, 28 April 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
Gaashanle Sare M. S. Cusman

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 26.*

*Mogadiscio, li 29 Aprile 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

#### WASAARADDA HAWALAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay jaalle Barre Cali ku yaal  
Muqdisho, xafadda Bondhere T. G. 710-66*

Jaallaha kor wu magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku fadhiiya 560 mdh., ee lagu soo diray warqadda teradeedu ahayd 710-844-68 waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga ah waxuu whan yahay 19x11,5 la mid ah mdh. 218,50 ee aan ahayn sidii kore ee kor ku dhigan, soohdimoohisina waa:

Waqooye Cali kristan: Konfur Jid; Galbeed Cali Moxa'med iyo Bue; Bari Jid.

Muqdisho, 22 Maggio 1973.

(L. 45) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

#### WASAARADDA HAWALAHA GUUD

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Cusman Roble, u usoo qortay arjii qaybta Dhismaha iyo Dhulka 22-3-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Bur Hindi, oo leh qiyaas Rektangular kuna fadhiiya 41x28 (1.148) mdh.

Soohdin: Waqooyi Walaha Warsame Jamac; Koofur Jid; Galbeed Xirsi Dhore; Bari Salad Xirsi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaakaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 46) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Halan Maxamed Abditon, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 13-2-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 13,5x13,5 (182,25 bdh).

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Ciddii Libax; Galbeed Cali Nur; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaaka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 47)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

---

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdixamid Mohamud Carale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 11-4-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadag, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 13x13,50 (182,25 mdh).

Soohdin: Waqooyi Axmed Cabdow; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Xalima Roble.

Qofkii damnaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaaka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 48)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Xaxan Cusman, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18-April 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan - Jidka Umadda, oo leh qiyaas Rektangular kuna fadhiya 18x13,5 (243) mdh.

Soohdin: Waqooyi Xaji Gaweys; Koofur Canshur Xasan; Galbeed Yusuf Cali Abikar; Bari Jidka Ummadda.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal. Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaakaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 49)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

---

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aléssandra Fianello Cabud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 1-4-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 40x20 (800) mdh.

Soohdin: Waqooyi Ji; Koofur Jid; Galbeed L. 1403 iyo 1404; Bari Dhul E. 2250 iyo 2251.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal. Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaakaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 50)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdinur Xaji Xashi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 28-4-1973kii, uu leh qiyaas Rektangulur (60x28), kuna fadhiya 1.620 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jidka 30 mt. ah; Galbeed Jid; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki garaa naqashadda oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaaka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga zilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maggio 1973.

(L. 51)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Moxamed Cabdi Sacid*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR

---

Waxaan akhriyay dacwaddan;

Markaan arkay xaxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bangiga Kaydiska iyo danta waxaan ogaday ineyinay shaqadayda tahay;

Arkay qodbka 69 D. L. 9-9-65;

Waxaan cadaynayaa dhumidii bugga lacagta (Ammortamento Libretto) N. 3489, Sh. So. 2.000 (labakun shilin);

Waxaan amrayaa in loo sameeyo bugga ninka la yiraahdo Caddow Cali Jumale, muddo 30 beri ah oo ay ka bilabato malinta lagu shaciydo Bollettino Ufficiale ee Dowladda, haddaan qofkale oo sheganayaa gacanta laga saaro ninka kor ku qoran qof kale oo ka sita wakaalad shaki aan lahayn, iyadoo la sugayo 30kaas beri oo kor ku qoran.

Muqdisho, 8 April 1973.

(L. 52)

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA  
*Dr. Xusen Shekh Cabdiraxman*